## GURMADKA WARSHADAHA KORANTADA NUKLIYEERKA

Dhismaha iyo hawl-gelidda warshadaha korantada nukliyeerka ah ay la socoto oo xadayso Guddida Xadaynta Nukliyeerka ( Nuclear Regulatory Commission (NRC). Shilal ka dhaca warshadahaasise waa uun suuroggal.

Shil ayaa sababi karo shucaac aad u halis ah oo saamayn kara caafimaadka iyo nabdoonaanta bulshada ku ag nool warshadda korantada nukliyeerka.
Maaddooyinka reediyoo-shucaaca waxay ka kooban yihiin atamyo aan degganayn. Atamyada aan degganayna ay sii daayaan tamar badan inta ay ka degayaan. Tamarta ay daayaanna la yiraahdo shucaac.
.

Mid kastoo naga mid ihi maalin waliba uu shucaac u feydmo ka yimid ilo dabiici ah, oo ay ku jiraan qorraxda iyo dhulka. Raad yar oo shucaac ah ayaa ku sugan cuntada iyo biyaha. Shucaaca waxaa kaloo uu ka yimaadaa ilo dad samee ah sida raajada, telefishannada, iyo tinnaarrada mikrowaafka.

Warshadaha korantada nukliyeerka ahi ay isticmaala kul laga helo fishinka nukliyeerka oo ku jira meel sugan si biyaha loogu beddelo uumi, kaasoo ay ku shaqeeyaan jenereetarrada korantada maayadda ah soo saara.

Shucaacu wuxuu leeyahay saamayn wadareed. Marka uu bato qofka inuu shucaac la falgalaba, waxaa sii badanaya dhibaatada uu ku keeni karo qofkaas. U furnaan sare oo shucaac waxay keeni kartaa cudur xun ama geeri.

Khatarta iman karta ee shil ka dhaca warshad korantada nukliyeerka ee feydnaan shucaac. U feydnaantani waxay ka iman kartaa ka sii deynta reediyo actif laga sii daayo warshadda oo bay'adda lagu sii daayo, ay inta inta badan u calaamad tahay xawr (daruur u eg) samaysma oo gaas raadiyo actif ah iyo qurubyo ah.

The area affected by radioactive material release is determined by:

- The amount of radiation released from the plant.
- Wind direction and speed.
- Weather conditions.

## NUCLEAR POWER PLANT EMERGENCIES (CONTINUED)

Khataraha waaweyn ee la dersi kara dadka deggan agaggaarka meesha uu xawrka shucaacu ka dhaco waxa ka mid ah:

- Jirka oo uu shucaaca xawrka taabto iyo qurubyada oo ku hara dhulka.
- Neef-ku-qaadashada alaabaha shucaaca.
- Liqidda maaddooyinka shucaaca.

Haddii uu shil ku tacalluqa sii deynta warshad koranto ee maaddooyinka shucaacu dhaco, madaxda maxalliga ahu waxay samayn doonaan in ay:

- Hawlgelin doonaan hoonka digniinta ama hab kale oo digniineed oo laysku raacay.
- Telefishanka iyo raadiyaha maxalliga ah ka sheegaan Habka Digniinta Gurmadka (EAS).

Dawladaha Gobolka iyo kuwa maxalliga ah, hay'adaha Federaaliga ah, iyo madaxda korantooyinka ayaa leh qorshe waxkaqabasho gurmad haddii ay dhacdo gurmad warshad nukliyeer ah. Qorshayaashu waxay qeexaan labo Xadadka Qorshaynta Gurmadyada (Emergency Planning Zones (EPZs).

- Hal EPZ wuxuu ku eg yahay aag ah gudaha 10-mayl oo isku-wareeg ah oo ku siman warshadda ay ka suuraggasho in dad ay dhibaato ka soo gaarto u feydnaan toos ah oo shucaac.
- EPZ-ga kale wuxuu daboolaa aag ka ballaaran, oo inta badan ilaa 50-mayl oo isku-wareeg ah u jira warshadda ay maaddooyinka shucaacu ka sumayn karaan sahayda biyaha, dalagga cuntada, iyo xoolaha.

U feydnaanta shucaaca waxaa lagu yarayn karaa arrimahan:

- Waqti. Xadee waqtiga aad u feydan tahay maaddooyinka shucaaca. Inta badan shucaacyadu waxay lumiyaan awooddooda si dhakhso ah. Markuu dhaco shilka warshad nukliyeer, madaxda maxalliga ah ayaa la soconaya wixii shucaac ah oo baxsaday, waxaanay go'aamin khatarta halkaa ka timid.
- Fogaan. Mar kasta oo ay fogaan badani idiin dhexayso adiga iyo shucaaca, waa kaba sii fiican. Markuu dhaco shilka warshad nukliyeer oo khatar ah, madaxda maxalliga ah ayaa amraysa in laga daldasho meeshaa si ay u kordhiyaan fogaanta u dhexaysa adiga iyo shucaaca. (Daldalashadu waxaa kale oo ay yaraysaa waqtiga aad u feydan tahay shucaaca.)
- Gaashaamanaan. Mar kasta oo ay alaab culus oo xajmi fiican leh idiin dhexayso adiga iyo shucaaca, waaba ka sii fiican. Tani waa sababta ay madaxda maxalliga uhu kugula talinayaan in aad gudaha ku jirto haddii uu shil dhaco. Mararka qaar, derbiyada gurigaaga ah ayaa kuugu filan gaashaan ku difaaca.

## GURMADKA WARSHADAHA KORANTADA NUKLIYEERKA

## (WELI SOCOTA)

Waa muhiim ogaashada eraybixinnada loo isticmaalo in la qeexo gurmadyoka nukliyeerka:

- Ogeysiinta Dhacdo Silloon: Dhib yar ayaa ka dhacay warshadda. Lama malaynayo in wax shucaac ihi ay fakadaan. Saraakiisha Federaaliga ah, kuwa Gobolka, iyo degmada ayaa markiiba loo sheegayaa. Ma aha muhiim in aad tillaabo qaaddo.
- Qaylo: Dhib yar aa dhacay, oo cadad yar oo maaddo shucaac ah ayaa ku siiban karta warshadda gudaheeda. Tani way ku saamayn doontaa, waxna samayn maysid.

- Gurmadka Aagga Goobta: Dhib yara weyn ayaa dhacay, xoogaa yar oo maaddooyinka shucaaca ah ayaa ka siibtay warshadda. Haddii ay muhim tahay, saraakiisha Gobolka iyo degmada ayaa tillaabo qaadaya si ay nabdoonaanta bulshada u xaqiijiyaan. Hoonka digniinta ee aagga ayaa laga dhawaajinayaa. Xogta bedbaadada ka dhegayso raadiyahaaga iyo telefishankaaga.

- Gurmad Guud: Tani waa dhibka ugu khatarsan. Maaddooyin shucaac ahaa ka fakan kara warshadda iyo aaggeedaba. Hoonka waa laga dhawaainayaa. Xogta bedbaadada ka dhegayso raadiyahaaga iyo telefishankaaga. Saraakiisha Gobolka iyo degmada ayaa tallaabo ay ku bedbaadinayaan bulshada qaadaya. U diyaarsanow in aad raacdo tilmaamahooda markiiba.

Waa inaad

- Barataa habka digniinta ee bulshada. Warshadaha korantada ee nukliyeerka waxaa ku waajib ah in ay rakibtaan hab qaylodhaaneed iyo habab kale oo digniineed (nalal biliglaynaya oo digniineed) oo ku xeeran aag 10 mayl ah oo hareeraha warshadda ah.

  - Soo ogaataa xilliga iyo hababka digniinta loo tijaabsho.
  - Marka la tijaabsho hababka digniinka ee aaggaaga, ogow in aad gurigaaga ka maqli kartid hoonka ama aad ka arki nalalka digniinta.

- Ka hel xogta gurmad ee bulshada.(EPI) shirkadda korantada ee wadda warshadda korantada ama xafiiska adeegyada gurmadka ah maxalliga ah. Haddii aad warshadda u jirto 10 mayl, waa inaad xogtaan sanadle uga heshaa shirkadda korantada ama xafiiska adeegyada gurmadka ah maxalliga ah..

- Baro qorsheyaasha gurmadka ee dugsiyada, xarumaha dhay keerka, guryaha waayeelka, iyo meelaha kale ee xubnaha qoyskaaagu ay isaga daba noqnoqdaan. Baro meesha ay dadka aadayaan haddii lacalla meesha laga yara qaxayo.

## GURMADKA WARSHADAHA KORANTADA NUKLIYEERKA

## (WELI SOCOTA)

Waa khasab in ay muwaaddiniintu daldalasho u diyaargaroobaan.
.

Qodobbo muhiim ah haddii iyo intii gurmadka lagu jiro:

- Dhegayso digniinaha. Dhacdo kastaa kama timaaddo baxsiga shucaac. Dhacdada waxaa lagu xallili karaa warshadda dhexdeeda oo aysan keeni karaynin khatar guud.

- Dhegta ku hay raadiyaha maxalliga ah ama telefishanka. Madaxda maxalliga ah ayaa bixin doonta xog iyo tilmaamo gaar ah.

  - Talada la baxsho waxay ku xiran tahay nooca gurmadka, degdegga ay isu beddelayso, iyo intee shucaac ahoo baxsanaysa haddiiba ay baxsadaan.
  - Tilmaamaha maxalliga ahaa ka muhiimsan kuwa idaacadaha heer qaran ama buugaggaba ku taal.
  - Daalaco xogta bulsho ee aad ka soo qaadatay shirkadda korantada ama saraakiisha dawladda.

- Daldalo haddii lagugula taliyo.

  - Xir oo qataar albaabbada iyo daaqadaha
  - Ha xirraadeen daaqadaha iyo neefsheyaasha gaariga. Isticmaal hawada wareegaya.
  - Ka dhegayso raadiyaha jidadka lagu baxayo iyo tilmaamo kaleba.
- Haddaan lagugula talin inaad daldalato, ku jir meesha aad joogto.
  - Xiro albaabbada iyo daaqadaha.
  - Demi eer kundhishinka, marwaxadaha laydha, farnaska, iyo kuwa hawada soo jiida oo dhan.
  - Tag taxtiga ama meel kale oo dhulka hoostiisa ah haddii ay suuraggasho.
  - Had iyo jeer raadiyo beteri ku shaqeeya hayso.

- Hoosi oo cunto kaydsanayd ku quudi xoolaha, hadduu waqtigu oggolaado.

- Ha isticmaalin tilifoon, hadduusan aad lagama-maarmaan u ahayn. Khadadka waxaa loogu baahan doonaa wicitaannada gurmadka.

- Haddaad dareento in aad u feydantay, qabays buuxa qubayso.
  - Iska beddel dharka iyo kabaha.
  - Dharka uu taabtay shucaaca ku rid jawaan bac ah.
  - Xir jawaanka, meel durugsanna dhig.

- Geli cuntada weelal daboolan ama qaboojiyaha. Cuntadaan hore u daboollayn waa in la dhaqaa intaan weelasha lagu shubin.

## GURMADKA WARSHADAHA KORANTADA NUKLIYEERKA

## (WELI SOCOTA)

Qodobbada muhiimka ah haddii ay gurmad dhacdo:

- Haddii lagu dhaho ka daldalo, guriga ku soo noqo ka dib markii ay madaxda maxalliga ah kugula taliso uun keliya.
- Haddii lagugula taliyo in aad guriga joogtid, gudaha ku jir inta ay madaxda maxalliga ahi ka sheegayaan in ay bixiddu nabdoon tahay.
- Raadso daweyn caafimaad wixii astaamo ah oo caadiga ka baxsan, sida matag soo booda, taasi oo laga yaabo in uu la xiriiro u feydnaan shucaac.

**[THIS PAGE WAS LEFT INTENTIONALLY BLANK.]**